# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened: - 10:07 AM** **Hansard No.21/7** **Kal-fadhiga 21aad**

**Fadhiyadii** ***09/06/2013***

**Dooda Xeerka Maamuuska M/weynaha, M/ku-xigeenka iyo Mudanayaasha Barlamaanka waxaa ka qeyb-galay 8 Mudane**

1. **Md. Axmed Maxamed Nuur:-** shir-gudoonka, Mudanayaasha Golaha, Saxaafada iyo Marti-sharafta marka hore waan idin salaamayaa, Beyj number xeerku malaha markaa waaa in loo sameeyo Beyj number.

**Qodobka 4aad F/3aad** oo leh *"In la siiyo hal gaadhi, dareewal, Laba shaqaale, in la ilaaliyo nabadgalyada iyaga iyo guryahoodaba kuwaas oo kharashkooda dawladu bixinayso"* Mudanayaal Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka waxay huwanyihiin sharaftii dalka iyo dadka markaa halkaa anigu waan ka kordhiyay oo waxaan ka dhigay laba gaadhi oo isagu mid wato, midna qoyska loogu shaqeeyo halkii dareewalkana laba darewal ayaan ka dhigey, halka ilaaladana waxaan idhi waa inay ilaaliyaan 4 askari midkiiba si nabadgalyadoodu taam u noqoto.

**Qodobka 5aad F/4aad** halkaa waxaan ku darayaa laba Xaraf oo aan ku darayo waxyaabahay ku waayi karaan iyadoo tan horena aan ka dhigayo a), (**b)** *haday ku cadaato inay xidhiidh la yeeshaan midkood ama labadooduba Cadawga Somaliland.* Waayo haday xidhiidh la yeeshaan wadamo inagu cadawa ah waxay ku waayi karaan xuquuqdaas sharciga la horgeeyaa. **(c)** ***"****hadii ay si toos ah uga horyimaadaan barnaamijka siyaasadeed ee gooni isu-taag Somaliland"* taana way waayi karaan Xuquuqdaa.

**Qodobka 10aad F/3aad** waan saxayaa iyada oo waxaan ka saaray inta dambe ee ah **"dambiyada laga galo hawl-wadeen qaran"** oo intaasi kuma haboona ayay ila tahay. Qodobka 1aad F/11aad iyo 12aad ee Gunada hawlgabka mudanayaasha ka hadleysa, markaa mudanayaal horta shaqaale ma nihin oo markaynu xilka ka degno maaha in hawlgab la inoo qoro, marka xilku inaga dhamaado ma lihin Mushahar joogta ah, tan iminka inoo qorani waa mushahar joogto ah taasina waxaan qabaa inaanay meesha le'ekeyn.

Marka dalkeenu barwaaqo yahay way dhici kartaaba, laakiin maanta sideynu nahay waxaan u arkaa somalidu waxay ku maahmaahdaa waayeel wa'ayo iyo waa inagoo is yeel yeelayn, markaa taasi suurtagal maaha oo ma haysano dhaqaale inagu filan markeynu 164 Mudane nahay oo 5 sano 164 soo kordhaan waa xad dhaaf ayaan qabaa taasi oo suurtgal maaha, shaqaalahaa markey hawlgab noqdaan mushaharka bishii sanadka la siiyaa, markaa yaanay umadu ina maqal ileyn hadii kale daaqadahaa la inooga soo galiye.

Tan kale, cadaalad daraa ka muuqata oo waxaa la yidhi kan 9 sano dhameysta ama ka badan wuxuu leeyahay 50% mushaharka sanadkii, somalidu waxay ku maahmaahdaa lafta dhuuxoo xarago ha ka tagin, Markaa xaqaa'iqda jirta aan ku dhaqano waxaan jirin yaynaan doon-doonin.

Anigu waxaan leeyahay kii 9 sano jooga iyo kii kaleba (qaxri-jaari) mar kaliya Sanadkii bil mushaharkeed ha la siiyo oo intaa halgu daayo, Sanadkii bil mushaharkeed in laga dhigo ayaan soo jeedinayaa, sheekadaasina yaanay inagu sii socon.

**Qodobka 14[aad]** waxaa ku qoran wuxuu khuseeyaa, waxa khuseeyana lama sheegin, markaa waxa khuseeya waa xeerkan oo halkaa ka dhiman iyana ha lagu daro, intaas ayaan ku soo koobayaa, waad mahadsantihiin.

2. **Md. Farxaan Maxamed Cali:-** shir-gudoonka iyo Mudanayaasha marka hore waan idin salaamayaa, anigu laba qodob ayaan taabanayaa oo kala ah.

**Qodobka 5[aad] F/4[aad]** ee xuquuqda waxay ku waayi karaan Madaxweynaha iyo ku-xigeenku ka hadlaysaa waxay ka hor imanaysaa Dastuurka, sababtoo ah wuxuu damaanad qaaday dastuurku xuquuqda Qaranimo oo wuxuu u ogolaaday in Madaxweynaha, Ku-xigeenka iyo Gudoomiyayaasha Golayaashu Xubin sharafeed ka noqdaan G.Guurtida oo halkaa ka doodi karaan, mida kale taladii siyaasiga ahayd ayuu u diidayaa oo ka horimanayaa, Sidaa darted waxaan soo jeedinayaa Faqradaas ha laga saaro Xeerka.

**Qodobka 11[aad]** waxaa hore u dhacdey xiligii Maxamed Ibrahim Cigaal in Xeerkan naloo soo gudbiyay markaa Mudanayaashii markaa joogay waxay ku dareen Xeerkii Madaxweynaha iyo M/weyne ku-xigeenka ka hadlayay oo raaciyeen Mudanayaasha tii ayuuna Xeerku u dhintey, waa daw oo anigu waan waafaqsanahay in Mudanayaasha lagu soo daro, laakiin barigaa Mudanayaashii loo saarey waxay ku soo dareen wax badan **Maanta tii** baa dhacdey, Markaa waxaa odhan lahaa Sida mudanihii iga horeeyay sheegay Sanadiiba Bil Mushaharkeed ha laga dhigo oo 1 year ha lagu daro ayaan soo jeedinayaa.

3. **Maxamuud Jaamac Cilmi:-** shir-gudoonka iyo Mudanayaashuba waad salaamantihiin, laba maamuusbaa isku hoos jiree ka hore ee maamuuska Madaxweynaha iyo ku-xigeenka **Qodobka 6aad** horta waxa aynu qoreyna yaanu noqon wax dastuurka ka hor-imanaya hadii kale wax iska noqonayaa waraaq uun, halkan waxaa tidhaahdeen xilligu u bilaabmayo laba qeybood, qaar waxaad tidhaahdeen Markuu xilka ka dago, midna waxaad ku qoran markuu xeerku soo baxo, markaa ileyn laba xeer ma soo baxayaan.

   Dastuurka eega Xuquuqda way ku simanyihiin Madaxweynaha, Ku-xigeenka iyo Mudanayaasha labada Gole oo dastuurkey ku qoran tahay lama kala reeb-reebin, sidaa aawadeed waa isku wakhti wuxuuna bilaabmayaa marka Madaxweynuhu saxeexo oo uu sharci noqonayaa, Markaa **Qodobka 6aad** xuquuqdii dastuurka ayuu ka hor-imanaya ee waa in lagu noqdaa.

   Tan siyaasiga ah, Siyaasada haduu galo taasina waa gaf dastuuriya, waxan lagu karaameynayaaba waa Siyaasada uu galay darted markaa **Qodobka 5aad F/4aad** waa in laga saaro oo dib ugu noqda, tan inaga ina khuseysa sidaa Axmed u taaban mayo waxbadan baan ka odhan lahaaye waxaan diidayaa camerada i hortaagan ee saxaafada oo ma doonayo in saxaafada uu galo, markaa hoos aynu u galno oo u eegno ayaan kaga baxayaa.

4. **Md. Siciid Warsame Ismaciil:-** shir-gudoonka iyo Mudanayaashaba waan salaamayaa, waxaan ugu horeysiinayaa **Qodobka 6aad** ee sheegaya Xilliga bilawga Gunadad Madaxweynayaasha, sidaa uu sheegay Mudanaha iga horeeyay waxaa jeclahay inay ka bilaabanto xiligaa horta, laakiin Madaxweynayasha iyo Gudoomiyayaasha Sharcigu wuxuu siiyay inay ka mid noqdaan Xubin sharafeed G. Guurtida waxayna ku leeyihiin mushahar, xagan waxbaa loogu cayimay , markaa labadaa mushahar sidee ayey ku noqonayaan taas in la eego waa muhiim.

   Sidoo kale sidii Axmed ka hadlayay Mudanaha Golayasha Sharci-dejinta ee dhameysta mudo xileedka 9 sano in la siiyo Guno, taasi waxaad moodaa iney dastruurka ka soo hor-jeedo oo waxay dhiirigalineysaa in 9 sano la fadhiyo Golaha halka ay mudada xilka mudahana dastuurku sheegay tahay 5 sano, markaa waxaad moodaa Shaad cid loo tolayo, halkaa ha laga dhigo "Xeerkani wuxuu khuseeyo Mudanayaasha Golaha" sida Mudanaha iga horeeyay sheegayna waxaan jeclaan lahaa taas in fadhi xidhan lagu dhameeyo.

5. **Md. Siciid Cartan Cismaan:-** Mudanayaasha Golaha iyo Shir-gudoonka dhamaantiin waad salaamantihiin, waxa weeye, hadaan ku horeeyo Xeerka waxaa meesha ku qoran Guno hawlgab iyo xuquuq, horta waxa weeye inagu shaqaale ma nihin, waxaa laakiin jirta mudanuhu xaq buu u leeyahay sideynu Madxweynaha iyo Ku-xigeenka u ixtiraameyno ay tahay loo ixtiraamo mudanaha oo markuu dhameysto xiligiisa in uu helo Guno lagu sagootiyo, sida sanad inta uu nolosha dib ugu noqonayo.

   Markaa waxaan halkaa qabaa inteynu habeyno laga dhigo Guno lagu sagootinayo Mudanaha Xilkiisu dhamaado taas ayaan qabaa inay kaga haboontahay in Guno hawlgab iyo Xuquuq nidhahno, waa macquul inaynu xeerarka dalalka ka soo dheegano sida Kenya oo barigii dhoweyd mudanayashi xilkoodu dhamaadey la siiyay boqol kun oo dollar, inaga dalkeenu waa dal aad u faqiira oo dhaqaale badan haysan, Markaa Maximam in Mudanaha 20 kun oo dollar la siiyo ama Bil mushaharkeed sanadkii la siiyo oo aynu kala doorano labadaa, waxan la kala saarayo ee 9 sano iyo inteynu iska deyno in la mideeyo oo intaa lagu soo kobo ayaan qabaa.

6. **Md. Jaamac Xasan Aadan:-** Qodobka gunada bilowga waxaan u saxayaa oo anigu u fahmay inay tahay ragii hore in looga bilaabo marka sharciga la ansixiyo qoladan iminka xilka haysana looga bilaabo marka xilku ka dhamaado waayo waxay la kulmeen sharci ansaxsan Markaa sidaas ayaan u fahmay.

   Waxaan mudanayaasha Ku raacsanahay in halkaa Gunada iyo arrimaheenaa aynu ka dhigano fadhi xidhan oo ku falaqeyno.

   Halka Mudanahii hore soo jeediyay in Gawaadhida 2 laga dhigo waxaan qabaa sida xeerku ku qoran in laga dhigo gaadhiga kaliya iyo shaqaalahaba.

   Waxaan ku dari lahaa Geerida nin ka tirsan Labada gole in loo cayimo waxaa jirta in inagu markey timaado aynu 100 dollar iska jarno markaa ama taas ha lagu badalo ama si kale ha loo dhigee waxaan soo jeedinayaa in wax lagaga daro arrinkaa geerida, waad mahadsantihiin.

7. **Maxamed Saalax Cige:-** marka hore shir-gudoonka iyo Mudanayaasha waad salaamnatihiin, sida Mudanayaashii iga horeeyay sheegen horta xeerkani waa laba xeer isku jira, in la kala saaro oo laba Xeer laga kala dhigano waan waa faqsanahay.

**Qodobka 4aad** ee Xuquuqda Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka hore xuquuqaha dastuurku siiyay oo dhan waa inay ka muqdaan oo xuquuqaha kale ee dastuurku jideeyay in lagu daro ayaan soo jeedinayaa iyo xuquuqda siyaasiga ahba.

**Qodobka 5aad** ee Guno maamuuska waxa lala adeegsanayaa sida xeerkan ka muuqaata Xeerka Mushaharka Madaxweynaha iyo Golayaasha oo sheegaya in 25% laga siinayo, markaa anigu waxaan soo jeedinayaa in xeerkan laftigiisa faahfaahin la siiyo oo halkan lagu cadeeyo sida loola adeegsanayo iyo Mushaharkii oo dhameystiran iyo madaxyadii uu lahaa oo dhan.

**Qodobka 5aad F/4aad** ee Xuquuqda lagu waayayo wuxuu tilmaamayaa in laba nooco oo xil ahi farqada ku qoran yihiin oo kala ah inuu xil qabto oo bodyga dawlada ka mid noqdo iyo Xaqii siyaasiga ah, Markaa waa in laga saaro Xuquuqdiisa asaasiga ah ee dastuuriga oo lagu daayo xilka dawlada uu ka qabto ee mushahar ku qaadan karo.

**Qodobka 6aad F/1aad iyo 2aad** isla xeerkan uun baa jideynaya, Markaa in labada mid la qaato weeye oo la yidhaahdo waxay u bilaabmeysaa Marka Xeerkani dhaqangalo, Waxaana soo jeedinayaa in Maamuuskaasi ka bilaabmo Marka Xeerkani dhaqan galo oo ay wakhtiga ay u bilowdaan oo hal qodob uun baan ka dhigayaa uun.

**Qodobka 9aad** had iyo jeer Aas qaran baa loo sameyaa Geerida madaxweynaha markaa waxaa haboon in halkan ku xuso oo procedure loo sameyo xeerka ku qaran.

**Qodobka 10aad** uma qorna qaabka sida qodobada hore markaa waa in lagu cadeeyo sida Xeerkan qodobadiisa hore sheegayaan Faqradaha Qodobkan waxa ku qoranina waa maamuuskii dastuurku ina siiyay ee uu xusay.

**Qodobka 11aad** waxaan ku raacsanahay Mudanayaashii iga horeeyay ee sheegay in meesha laga saaro kala sareynta ama mudada 9 sano ah iyo inta loo qoondeeyay ee 50%, way adagtahay qof dawlada u shaqeynayay oo mushahar 50% ha la siiyo aad bay u adagtahay, anigu waxaan soo jeedinayaa in sanad ama laba sano lagu cayimo oo kaliya.

Xeerkan marka uu dhaqan galo waxa jira inuu la jaanqaado oo halkaa ka bilaabmo, Maamuuskuna intaas uun maahee waa in lagu soo daraa Maamuuska kale ee ka maqan.

**Waxaan soo jeedin lahaa:-**

- in qaab sidan ka haboon loo soo habeeyo xeerka, waana Xeer aad u muhiima.

8. **Md. Baar Siciid Faarax:-** waxaan la qabaa Mudanayaashii hore u hadlay oo iyaaga waxba ku noqon mayo.

   **Qodobka 4aad F/1aad** waa in la sii faah-faahiyo Qodobkaa sida da'adaa 18 jirka ah sidoo kale waxaaba jira dad aan Caruur lahayne.

   **Qodobka 11aad** ee isna sheegaya 9ka sano waa in meesha laga saaro waayo waa sharci daro in 9 sano la sii fadhiyo meesha, intii kale waa la sheegay waad mahadsantihiin.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI** |
| ------------------------------------------------ | ------------------------------------------ |